

Warbixin loogu talagalay xilhaayeyaasha xannaanadda/waalidiinta leh ilmaha dugsiyada xannaanadda iyo iskuullada

2021-04-07

Waxa aad sameeynayso muhimad ayay leedahay. Joojinta fayruus-faafinta kaalin ka geysa.

Waan idin salaamay!

Waan ogsoon nahay in dad badan ay ku daaleen safmarka iyo la qabsashada xaaladda jirta. Waa arrin dhib badan, waxaana aad ugu mahadcelinaynaa dhammaan xilhaayeyaasha xannaanadda/waalidiinta oo halgan xaaladda ugu jira, oona tixgeliya xadadyamada hirgaleen, taasoo suurtagelin doonto in dugsiyada xannaanadda iyo iskuullada aan albaabada loo xirin, iyo in ilmaha iyo ardayda waxbarashada lagu siiyo goobaha ugu habboon oo ah – dugsiyada xannaanadda iyo iskuullada.

Waxaa dhacdo in xilhaayeha xannaanadda/waalidka aynan tixgelin nidaamyada iyo dardaaranada. Adigu ma ku daashay tixgelinta dardaaranada mana iska dhego tirtaa? Fayruusku wuxuu weli ku faafayaa bulshadeenna. Tan kale, waxaa faafayaa fayruuskii oo isbeddel isku sameeyay. Haddaba sida aan dib helno noolol-maalmeedkii aan berri hore ku noolayn awgeed waxaa aad muhim u ah in qof kasta u muujiyo dulqaadasho oona tixgeliyo qodobada nidaamyada hirgaleen. Waxa aad sameeynayso muhimad ayay leedahay. Joojinta fayruus-faafinta kaalin ka geysa. Qodobada waxaad ku tixraaci kartaa adigoo tixgeliya shaqaalaha, ilmaha iyo xilhaayeyaasha xannaanadda/waalidiinta kale, waa hab-dhaqan ka hortegi karto faafinta fayruuska.

Gurigaaga iska joog waxaana tixraaca nidaamyada karantiil/faquuq u degsan haddii:

- aad dareemaysaan calaamadaha cudurka
- aad ka soo laabateen dal dibadda ku yaallo

- aad sugayso jawaabta shaybaarka
- u qof qoyska ka tirsan ku dhaco cudurka [Covid-19]

Qof kasta, ilmaha iyo dadka waawayn ba, oo cudurka [Covid-19] ku dhacay wuxuu faafin karaa fayruuska. Xaaladdaas waa in uu hal toddobaad karantiil/faquuq, oona muddo 14 maalmood fiirogaar siiyaa calaamadaha cudurka. Macnaha karantiil/faquuq guriga [Hemkarantän] waxaa weeyaan in dhammaan xubnaha guriga ay guriga joogaan oona ay dad kale la kulmin. Muddada waalidka u ku sugan yahay karantiil/faquuq guriga looma oggola in ilmaha u keeno ama ka kaxeeyo dugsiga xannaanadda ama iskuulka. Qoysku waa in uu sidaas u dhaqma xitaa markii u sugayo jawaabta shaybaarka.

Waa in kala fogaanshada la tixgeliya oona aan la aadin dugsiga xannaanadda ama iskuulka

Markii ubadkaaga aad geynayso ama ka soo kaxeeynayso waa inaad ku dhaqaaqda adigoo goobaha dibadda ku yaalaan ku sugan. Sida ciriiriga looga hortago awgiis waxaa muhim ah in aad guda gelin goobaha dugsiga xannaanadda ama iskuulka.

Ilmaha dartooda dugsiyada xannaanadda iyo iskuullada waa in aan albaabada loo xirin

Haddii tiro aad u badan oo kamid ah shaqaalaha ku dhaco cudurka [Covid-19] waxaa dhici karto in dugsiga xannaanadda ama iskuulka albaabada loo xiro ama loo rogo wax ku barashada musaafada ku salaysan. Taasoo saamayn ku yeelan doonto kartida waxbarashada ilmaheenna iyo ardayda ba, waxaana dhici karto in dhibaato ubadkaaga u keento. Maadaama aad tahay xilhaayaha xannaanadda/waalidka waxaad tahay bay'adda shaqada ee ardayda iyo shaqaalaha ba. Sidii shaqaalaha u xajin lahaayeen caafimaadkooda oona wax goobta dugsiga xannaanadda ama iskuulka ugu bari lahaayeen ilmaheenna iyo dhallinyaradeenna waa inaad kaalin ka geysato oona tixraacdo nidaamyada.

Safmarka maalin buu dhammaan doonaa, laakiin waa in aan iska kaashanaa joojinta fayruus-faafinta, taasoo noo suurtagelin doonto in aan dib ugu noqonno noolol-maalmeedkeenna caadiga ahaa. Sidaas darteed maadaama aad tahay xilhaayaha xannaanadda/waalidka waxaan kugu guubaabinaynaa inaad tixraaca talo-siinta iyo nidaamyada Maamulka Gobolka Östergötland.

Mahadcelin naga guddoon maadaama aad ADIGA kaalin ka geysatay oona xilkasnimo noo muujisay sidii loo joojin lahaa fayruus faafinta!

Salaan wacan naga guddooma
Xafiiska arrimaha waxbarashada